Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta

Soo-jeedinayaa

# Yashuuca Baa Taladii La Wareegay



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Janie Forest
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: Ruth Klassen

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org


©2023 Bible for Children, Inc.
Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.

Muuse wuu dhintay. Yashuuca wuu yaqaanay Ilaah wuxuu u doortay isaga inuu hoggaamiyo Israa'iliyiintii. Horay baa loogu diyaariyey ciidanka Yashuuc, isna wuu isu diyaariyey qudhiisa. Ilaah wuxuu u ballan qaaday Yashuuca guul iyo barwaaqo eek u jirta dhulkii ballanta haddii ay dadka marwalba ay adeecaaan Ereyga Ilaah.



Israa'iliyiinta waxay u ballan qaadeen inay raacayaan Yashuuca oo ay aqbali doonaan Ereyga Ilaah. Si Xigmadaysan, Hoggaamiyihii cusbaa basaasiin buu u diray Kancaan inay soo xuuraan digaaca magaalada weyn ee Yerixoo. Weerarka dagaalka ugu horeeyea ee Israa'iiliyiinta ayaa noqn doona meeshaa.






Qof baa u sheegay boqorkii Yerixoo inay magaalada ku jiraan laba nin oo basaasiin ah. Wuxuuna diray ciidamadiisii inay soo helaa. Baaritaankii baa ka bilowday gurigii Raxab, meeshii ay joogeen nimankii. Askartii si xoog badan bay albaabbkii u garaaceen. Durbadiiba, Raxab waxaey ku qarisay nimankii caws xariir ah saqafka dushiisa.


Markii ay ka tageen Raxab askartii, Raxab waxay u isticmaashay inay ku daadijiso xagag hoose xarig si badqab ah dibadda derbiga magaalada. Maxaa iyada ku kalifay inay caawiso iyaga? Sababta waxay ahayd wey ogayd inuu iyaga Ilaah la jiro. Waxayna dooneysay inay nafteeda Ilaah u hibeyso. Basaasiintiina wxay u ballan qaadeen inay badbaadin doonaan qoyskeeda.




Intii aan la gaarin Yerixoo, Israa'iliyiintii waxay ka gudbeen webiga Urdu oo Kancaan bay gaareen. Kancaan, Dhulkii ballanta. Halkaa kaabad (Buundo) kama jirin! Sidee bay haddaba uga gudbeen?




Ilaah wuxuu ku yidhi Yashuuca wadaaddada waa inay hoggaamiyaan ciidanka iyo dadakaba, iyaga kor u sidaan sanduuqii Ilaah ee ay ku jiraan qoraalkii tobanka amar ee Ilaah.  Markii wadaaaddadii cagahooda taabteen faraqyada webiga, Ilaah mucjiso ayuu sameeyey Ilaahna waddo engagan ayuu biyihii dhexdooda ka sameeyey.




Ka dib markii dakii oo idil badqab ku gudbeen, Waxay dhigeen laba iyo toban dhagax ah badda hoosteeda ay ka oo qaadeen ayay qotomiyeen degtii shishe ee Kancaan ee webiga kaa aadanayd. Waxay ka caawin doontaa xusuusta dadka inay baraan caruurtooda waxyaalaha ku saabbssan awoodda iyo jacaylka Ilaah.






Yerixoo waxay lahayd darbiyo adaag oo dhuu-dhuuban. Intii uu Yeshuuca qorshaynayaya weerarkiisa, Ilaah wuxuu u soo diray Dhame (Kabtan) ciidankii ka yimid xagga samada inuu xusuusiyo Israa'iliyiinta taliyahan cusub oo uu Ilaah ku guuleynayo dagaalada dadkiisa.




Ilaah wuxuu u sheegay Yashuuc sidii – habkii uu ku weerari lhaaa Yerixoo. Qorshe yaable leh buuna ahaa. Ilaah dadkiisii waxay ku warwareegeen magaaladii kolba mar muddo ku siman lix maalood, oo toddoba mar maalintii toddobaadna. Deedna waxay afuufayeen buunan dhawaaq dheer leh iyo qaylo badan, oo derbiyadii magaalada ayaa iska dhacay!


Yashuuca iyo ciidankiisii waxay sameeyeen wwixii Ilaah ku amray inay sameeyaan.  Laga yaabee dadkii Yerixoo joogay ay ku qoslayeen iyaga.  Laakiinse wareeggii toddobaad wadaaddadii waxay aad u afuufeen buunankii wananka geesahooda.





Oo ahad sidii Ilaah kula ballamay .........
DERBIYADII WAAWEYNAA EE YERIXOO WAY DHACEEN!





Aqalkii Raxab keliya ayaa ka badbaaday derbigii Xarig casaan ah bayna ka soo raaricisay dariishada sare. Durbadiiba, raggii Yashuuca ayaa soo samata bixiyey Raxab iyo reerkoodiiba. Dabadeedna way burburtay magaaaladii Yerixoo ahayd, sidii uu Ilaah ku amray.



Si rasmi ah, Yashuuca wuxuu la wareegay dhabkii, allaabtii naxaasta, oo hantidiii shaqada Ilaah loogu adeegayay bay noqdeen. Markiiba cidwalba oo Kancaan joogtay waxay maqashay sidii Yashuuca Yerixoo uu u qabsaday. Waxay ogaadeen in Ilaah la jiro dadkan.

Yashuuca Baa Taladii La Wareegay

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Yashuuca 1-6

"Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiyaa." Sabuurka 119:130

# Dhammaad

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16